

## Waxaan shaqaalaysiinaynaa Cunto Wareejiyayaasha Portland

Portland Public Schools waxay himilaynaysaa guul-gaaridda arday waliba, macallim waliba, dugsi waliba. Maskax kobcaysaa u baahan taageeradaada. Adoo Adeegga Nafaqada gacan ooga geysanayo nafaqeynta iyo qaabayta mustaqbalka Portland ka shaqee PPS.

Ka hel shaqo ku qanciso kuguna xirto bulshadaada goobaha kala duwan ee dugsi. Maalin waliba layaabkeed bay leedahay! Ku faan samaynta gabi ahaanbo cunto macaan oo caafimaad. Si farxad leh oogu qaybi lana qayb ardada. Xilli horena ka bog shaqada oo guriga gaar. Fasaxnow saacadaha usbuuca dhammaadka, fiidadka, iyo xilliga xagaaga!

### Dhis shaqo xirfadeed:

**Wax khibrad loogama baahno Cunto diyaariyayaasha.** Cunno diyaariyayaasha waxay wax ka baran doonaan xirfadlayaasha adeegga cuntada ee badan iyo kooxaha kushiinka ee kala duwan. Baro nafaqada, diyaarinta cuntada, iyo nadaafadda. Kororso khibrada u adeegidda macaamilka.

### Ka Caawinta Guul-gaaridda:

Shaqadan waxaa matalaya Ururka Shaqaalaha Caalamiga ee Adeegga (SEIU) waxayna siisaa marin u helida Barnaamijka Caawinta Shaqaalaha (EAP). Tababbarka lacagta lagu siinayo iyo taageerada xirfadda joogtada ah ee ay bixinayaan hoggaamiyayaasha qibrad leh.

### Gunnooyinka Kale ee Wanaagsan:

Fasax lacag lagugu siinayo

Jawi shaqo oo farxad iyo saaxiibtinimo leh

Mishaar bixinta xilliga fasaxa jirada ama xilliga fasaxa shaqada (PTO)

Maalmaha shaqada waxay la mid yihiin jadwalka iskuulka ee ardada

Fasaxa xagaaga ama fursadaha shaqooyinka xagaaga waa la heli karaa

Shaqo-wareegyada gaagaaban baa la bixiyaa (2-6 saacadood)

Halkii shaqo-wareegbo hal mar baad cunno bilaash ah helaysaa

Kaararka Trimet een la canshuurin baa la heli karaa/ikhtiyaar baakin gaari

Waxay ka bilaabmaysaa \$12.50 saacadiiba, macaashka wuxuu ka bilaabmaa shaqeynta 30 saacadood/isbuuciiba

### Waxa aan kaaga baahanahay:

Inaad jeceshahay la shaqeynta caruurta

Wakhti ilaalin iyo kalsooni

Inaad gudato waajibaadka aasaasiga ah ee shaqo-jireedka (eeg dhejinta shaqada)

Inaad ka gudubtid baaritaanka taariikh nololeedka kadib marka shaqada lagu siiyo

### Sida loo Codsado:

Ka eeg shaqooyinka oo onlayn ka codso careers.pps.net - baadh erayga "Roving"

Ama la xiriir Nae Hakala. Limayl: NHakala@pps.net. Taleefan: 503-916-3399

Cinwaanka: 501 North Dixon Street • Portland, OR 97227

2019-2020

## Macluumaadka Hawada Xumaata ee loogu talagalay Wadooyinka uu Maro iyo Goobaha La Joogsado ee Gaadiidka Guud ee (Baska Weyn) ee PPS

**Ku Socoto:** Waalidiinta ama mas'uuliyiinta ardayda isticmaalaysa baska yar ama adeega baska

**Ka Socoto:** Gaadiidka Ardayda PPS

**Tixraac:** Macmuulaadka wadooyinka barafka loogu talagalay ee sanad dugsiyeedka 2019-2020-ka

Qoraalkani wuxuu sharraxayaa sida Degmada jawaab u bixin doonto inta lagu guda jiro hawada xumaatay iyo sida [laga yaabo](#) in adeegaaga ay u saameeyaan barafka, biyaha barafka noqda, ama xaaladaha hawada ee aan wanaagsanayn ee kale. Qoraalkani waxa kale oo uu bixinayaa macluumaad ku saabsan fariimaha warbaahinta iyo nidaamyada la raacayo ee hawada xumaata ee PPS.

### Wadooyinka uu basku maro ee xaafadda dugsiya oo dhan uma baahna goob la joogsado oo beddel ah oo barafka loogu talagalay inta lagu jiro hawada xumaatay

Si aad u ogaato in dugsiyaagu uu leeyahay waddo barafka loogu talagalay fadlan eeg shaxda bogga 6 ee qoraalkan ama si aad u hesho macluumaad cusub oo dheeri ah eeg Dhammaan Badeelada ama Waddooyinka websaydhka [www.pps.net/bus](http://www.pps.net/bus) ama <https://sites.google.com/pps.net/gt-bus-schedule/>.

Waddooyinka barafka loogu talagalay waxa loo qorshayn karaa iany shaqeyaan SUBAXI ama GALABKI (ama labadaba) iyadoo ay kuxirantahay xaaladda wadada ama saadaasha hawada. **Fadlan si dhow ula soco ogeysiisyada Degmada oo dheeraad ah inta lagu jiro maalintii kuwaasi oo loogu talagalay isbeddelada.** Go'aanada Degmada ee la gaaray markii hadalkii hore lagu dhawaaqay ka dib waa laga cusboonaysiin doonaa dhammaan warbaahinta.

Ardayda dhigata Waxbarashada Gaarka ah (SE) ee isticmaasha baska yar ama adeegyada gaadiidka gaarka ah waxaa si toos ah loogu ogaysiin doona boostada (mail). Macluumaadka hawada xumaata ee adeegyada SE waxaa sidoo kale laga heli karaa: <http://www.pps.net/Page/2237>

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid fadlan soo wac ama emayl u dir.

### GAADIIDKA ARDADA

716 N.E. Marine Drive • Portland, OR 97211

503-916-6901 Fakis: 503-916-2707

[transportation@pps.net](mailto:transportation@pps.net)



## ALTERNATE EMERGENCY SNOW ROUTE STOPS

Paradas de emergencia para las rutas alternas cuando nieva

當下雪的時候校車站更換

Sẽ có những trạm ngừng khẩn cấp khác khi trời tuyết

**Альтернативные остановки на маршрутах школьных автобусов, в случае неожиданного выпадения снега**

**GOOBO KALE OO DARUURI AH OO UU ISTAAGI DOONO BASKU**

### ENGLISH

This information is very important. If you are unable to read it, please have someone explain it to you in a language you understand, or contact your school.

### SPANISH

Esta información es muy importante. Si usted no es capaz de leerlo, por favor obtenga a alguien que se lo explique en un idioma que usted pueda entender, o llame al 503-916-3582.

### RUSSIAN

Эта информация очень важна. Если вы не можете прочитать это, пожалуйста, попросите кого-нибудь, чтобы вам объяснили это на родном языке или вы можете позвонить по телефону 503-916-3583.

### VIETNAMESE

Tài liệu này rất quan trọng. Nếu quý vị không đọc được tài liệu này, xin vui lòng nhờ người quen giải thích bằng ngôn ngữ mà quý vị có thể hiểu được, hoặc gọi điện thoại số 503-916-3584.

### CHINESE

這些資訊是很重要的。如果你不懂得它的英文意思，請找某人用你瞭解的語言為你解釋，或打電話 503-916-3585。

### SOOMAALI

Macluumaadkan aad buu muhim u yahay. Hadii aadan akhrin Karin, fadkan raadso qof kuugu faahfaahiya luqad aad fahmayso, ama la xidhiidh dugsigaaga 503-916-3586.

Dugsiyada Dadweynaha Portland wey aqoonsan yihiin kala duwanaanshaha iyo qiimaha ay leeyihiin dadka oo dhan iyo kooxaha iyo doorka ay ku leeyihiin bulshada. Dhammaan dadka iyo kooxaha oo dhan waxaa loola dhaqmi doonaa si caddaalad leh marka ay noqoto dhammaan hawlaha, barnaamijyada, iyo hawlgalada, iyadoo aan la eegaynin da'ada, midabka, caqiigada, naafanimada, xaalada guur, dalka laga soo jeedo, jinsiyada, diinta, lab ama dhigid ama dookha galmo. Guddiga Siyaasadda Waxbarashada 1.80.020-P

Hawladeenka PPS waxay hadda shaqaaleysiinayaan dhowr fursadood oo kaladuwan. Darwaliin basas, Ilaayayaal, Cunno diyaariyayaal. Fadlan booqo careers.pps.net si aad u hesho liisto dhamaystiran ee shaqooyinka bannaan.

## Shaqaalaysiin buuxda ee Ilaaliyaasha

Portland Public Schools waxay himilaynaysaa guul-gaaridda arday waliba, macallim waliba, dugsi waliba. Bulshada dhan ayaa looga baahanyahay inay ka dhigaan dugsiyadeena kuwo xasillan oo aamin ardaydeenana ay ku guulaysan karaan.

Hawladeenka Xarumaha waxay hada agagaarka Portland ka shaqaaleysiinayaan dhowr kaalimood. Ka hel shaqo ku qanciso kuna xirto bulshadaada goobaha kala duwan ee dugsi-ga. Ku raaxayso shaqo firfircoon oo farxad leh halkaa ood saamayso dhab ah aad ku yeelan karto mustaqbalka Portland.

### Dhis shaqo xirfadeed:

Khibrad loogama baahna Ilaaliyaha; ka baro xirfadlayaasha xirfad nololaha ku anfacdo. Lacag baa lagu siin inta aad ku tababaraneysa qalabka, amniga, iyo waxqabadka ugu wanaagsan ee shaqada.

### Ka Caawinta Guul-gaaridda:

Shaqadan waxaa matalaya Ururka Shaqaalaha Caalamiga ee Adeegga (SEIU) waxayna siisaa marin u helida Barnaamijka Caawinta Shaqaalaha (EAP). Tababbarka lacagta lagu siinayo iyo taageerada xirfadda joogtada ah ee ay bixinayaan hoggaamiyayaasha.

### Gunnooyinka Kale ee Wanaagsan:

Fasax lacag lagugu siinayo

Daawooyinka, Caafimaadka Ilkaha, Caafimaadka araga, iyo macaashka hawlgabka PERS ee shaqada wakhtiga buuxa.

Mishaar bixinta xilliga fasaxa jirada ama xilliga fasaxa shaqada (PTO)

Shaqo galin-dambe (duhur kadib illaa fiidki) ee la jaanqaadi karto jadwalka gaadiidka dadweynaha

Kaararka Trimet een la canshuurin baa la heli karaa

Ka bilaabmayo \$14.95 saacadiiba

### Waxa aan kaaga baahanahay:

Wakhti ilaalin iyo kalsooni

Inaad ka gudbi kartid imtixaan xirfadeed gaaban oo doorasho leh

Isticmaalka kombiyuutarka ee aasaasiga u ah saacadda soo galiida/ka bixidda

Inaad gudato waajibkaada aasaasiga ah ee shaqada (eeg dhejinta shaqada)

Inaad ka gudubtid baaritaanka taariikh nololeedka kadib marka shaqada lagu siiyo

### Sida loo Codsado:

Ka eeg shaqooyinka oo ka codso careers.pps.net oo ka baadh "custodian"

Ama la xiriir Nae Hakala. Limayl: Nhakala@pps.net. Taleefan: 503-916-3310.

Cinwaanka: 501 N Dixon Portland, OR 97227

# Xaaldaha xumaatada hawada ee PPS

Iskuulada loo qoon-deeyay Wadada barafka loogu talagalay	Lambarka Wadada Joogtada ah ee Wadada loogu talagalay Barafka
ACCESS AT LANE	318.
ACCESS AT VESTAL	332, 333, 337, 335.
AINSWORTH	018, 200, 201, 202, 222, 227.
BRIDLEMILE	203, 204, 205, 206.
CAPITOL HILL	210, 218, 219, 221, 223, 225, 226.
CHAPMAN	010, 011, 013, 014, 019, 325.
FOREST PARK	015, 016, 017.
GLENCOE	303.
GRAY	209, 210, 215, 218, 221, 222, 223, 224, 226.
HAYHURST	023, 209, 207, 224.
JACKSON	020, 024, 026, 032, 207, 208, 211, 212, 213, 214, 216, 217, 219, 220, 225, 227.
KELLY	302.
LANE	324, 326.
LINCOLN	020, 022, 024, 025, 026, 031, 032, 033, 034.
MAPLEWOOD	211, 215, 216, 217.
MARKHAM	207, 211, 212, 214, 216, 220, 225.
RICHMOND	325.
RIEKE	207, 209, 210, 222, 224.
SKYLINE	021, 027, 028, 029, 030.
STEPHENSON	208, 213, 220.
WEST SYLVAN	010, 011, 012, 013, 014, 015, 016, 017, 023, 200, 201, 202, 203, 204, 205, 206.

Mar labaad. Haddii magaca iskuulkaaga hoostiisa aad ku aragto Lambarka Wadada Joogtada ah markaa waad leedahay wadada iyo joogsiga barafka loogu talagalay. Booqo [www.pps.net/bus\\_amahttps://sites.google.com/pps.net/gt-bus-schedule/](http://www.pps.net/bus_amahttps://sites.google.com/pps.net/gt-bus-schedule/) si aad u aragto sharaxaadda Waddooyinka Barafka loogu talagalay.

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan la xiriir Gaadiidka Ardayda 503-916-6901, ama emayl u dir [transportation@pps.net](mailto:transportation@pps.net).

FURITAANKA JOOQTADA AH EE WADDOOYINKA BARAFKA LOOGU TALAGALAY		
	FARIINTA WARBAAHINTA	FARIIN QEEEXAN
1a	Furitaanka Caadiga ah ee PPS. Dugsiyada gaarka ah ee wadada barafka loogu talagalay.	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ardaydu waxay imanayaan wakhtigii caadiga ahaa.</li> <li>Dhammaan dhismaha PPS way furanyihiin.</li> <li>Adeegyada basaska ee waddooyinka barafka loogu talagalay ee dugsiga gaar ah.</li> <li>Barnaamijyada dugsiga ka dib iyo maalinta la kordhiyay waxay shaqaynayaan gaadiid la'aan.</li> </ul>
1b	Furitaanka Caadiga ah ee PPS. Dhammaan basaska waxay isticmaalayaan waddooyinka barafka loogu talagalay.	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ardaydu waxay imanayaan wakhtigii caadiga ahaa.</li> <li>Dhammaan dhismaha PPS way furanyihiin.</li> <li>Dhammaan basaska waxay isticmaalayaan waddooyinka barafka loogu talagalay.</li> <li>Barnaamijyada dugsiga ka dib iyo maalinta la kordhiyay waxay shaqaynayaan gaadiid la'aan.</li> </ul>
2 SAACADOOD OO FURITAANKA DIB LOO DHIGAY		
	FARIINTA WARBAAHINTA	FARIIN QEEEXAN
2a	Dugsiga gaar ah oo ay leedahay PPS 2 saacadood ayaa dib loo dhigay. Dhammaan basaska waxay isticmaalayaan waddooyinka barafka loogu talagalay.	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ardayda dhigata dugsiga gaar ah ama dhammaan dugsiyadu waxay yimaadaan (2) saacadood ka dib marka loo eego wakhtigii caadiga ahaa.</li> <li>Dhammaan dhismaha PPS way furanyihiin.</li> <li>Dhammaan basaska waxay isticmaalayaan waddooyinka barafka loogu talagalay.</li> <li>Ku dejintii wakhti hore lagu dejinayay ardayda ee dugsiga xanaanada ubadka waa la baajiyay.</li> </ul>
2b	AMA Dhammaan PPS ayaa 2 saacadood dib loo dhigay. Dhammaan basaska waxay isticmaalayaan waddooyinka barafka loogu talagalay.	<ul style="list-style-type: none"> <li>Dugsiga xanaanada ubadka "Kindergarten" ee SUBAXDII waa la baajiyay.</li> <li>Fasalada dugsiga AXADA ee SUBAXDII la aado waa la baajiyay.</li> <li>Fasalada maalinta nuskeed iyo bartamaha maalintii la dhigto waxay shaqaynayaan iyadoo aanay jirin gaadiid dugsiga kuu qaadaya.</li> <li>Barnaamijyada dugsiga ka dib iyo maalinta la kordhiyay waxay shaqaynayaan gaadiid la'aan.</li> </ul>
2c	Dugsiga gaar ah oo ay leedahay PPS ayaa 2 saacadood dib loo dhigay.	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ardayda dhigata dugsiga gaar ah ama dhammaan dugsiyadu waxay yimaadaan (2) saacadood ka dib marka loo eego wakhtigii caadiga ahaa.</li> <li>Dhammaan dhismaha PPS way furanyihiin.</li> <li>Ku dejintii wakhti hore lagu dejinayay ardayda ee dugsiga xanaanada ubadka waa la baajiyay.</li> <li>Fasalada dugsiga AXADA ee SUBAXDII la aado waa la baajiyay.</li> </ul>
2d	AMA Dhammaan PPS ayaa 2 saacadood dib loo dhigay.	<ul style="list-style-type: none"> <li>Dugsiga xanaanada ubadka "Kindergarten" ee SUBAXDII waa la baajiyay.</li> <li>Fasalada maalinta nuskeed iyo bartamaha maalintii la dhigto waxay shaqaynayaan iyadoo aanay jirin gaadiid dugsiga kuu qaadaya.</li> <li>Barnaamijyada dugsiga ka dib iyo maalinta la kordhiyay waxay shaqaynayaan gaadiid la'aan.</li> </ul>
XIRITAANKA		
	FARIINTA WARBAAHINTA	FARIIN QEEEXAN
3a	Dugsiga gaar ah oo ay leedahay PPS ayaa xiran. Dhammaan basaska waxay isticmaalayaan waddooyinka barafka loogu talagalay.	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ardayda ka socota dugsiga gaar ah guriga ayay iska joogaan.</li> <li>Dhismayaal gaar ah oo dugsiga ka tirsan ayaa xiran.</li> <li>Dhammaan basaska waxay isticmaalayaan waddooyinka barafka loogu talagalay.</li> <li>Barnaamijyada dugsiga ka dib iyo maalinta la kordhiyay ee dugsiyada furan waxay shaqaynayaan gaadiid la'aan.</li> </ul>
3b	Dugsiga gaar ah oo ay leedahay PPS ayaa xiran.	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ardayda ka socota dugsiga gaar ah guriga ayay iska joogaan.</li> <li>Dhismayaal gaar ah oo dugsiga ka tirsan ayaa xiran.</li> </ul>
3c	Dugsiyada PPS way xiran yihiin. Xafiisyada way furanyihiin.	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ardada gurigay joogayaan.</li> <li>Dhammaan dhismayaasha dugsiga yaa xiran.</li> <li>Xafiiska dhexe ayaa furan.</li> <li>Rice wuu furan yahay.</li> <li>Gaadiidku way furan yihiin.</li> </ul>
3d	All PPS Closed	<ul style="list-style-type: none"> <li>Students remain home.</li> <li>All school buildings closed.</li> <li>Offices closed.</li> </ul>
NASHAADAADKA IYO DHACDOOYINKA FIIDNIMO EE LA BAAJIYAY		
	FARIINTA WARBAAHINTA	FARIIN QEEEXAN
4	Hawlaha galabtti loogu talagalay ee PPS iyo dhacdooyinka waa la baajiyay.	<ul style="list-style-type: none"> <li>Dhammaan hawlaha galabtti loogu talagalay, dhacdooyinka, iyo tababarada PPS waa la baajiyay.</li> <li>Fasalada fiidkii la dhigto ee lagu qabto dhismaha Benson waa la baajiyay.</li> </ul>

# Ogaysiiska & Nidaamyada Hawada Xumaata

## Helidda War Degdeg ah – Dakhso ah

PPS waxay ka shaqaysaa in ogeysiisyada la xiriira xiritaanka ama dib u dhaca ay qoysasku u helaan si dakhso ah oo cad. Iyada oo ay dheer tahay wargelinta warbaahinta, waxaynu isticmaalnaa:

- **Nidaam wicitaan telefoon otomaatig ah:** Oo Ingiriisi ah iyo luuqaddo la taageerayo oo loo dirayo lambarka rasmiga ah ee ku qoran foomka diiwaan gelinta ardayga. Waad beddeli kartaa lambarka telefoonka adiga oo sii maraya xoghayaha dugsigaaga.
- **Internet-ka oo la soo geliyo:** Halka ay ku qoran tahay “alert pod” ee [www.pps.net](http://www.pps.net) iyo dhammaan website-yada dugsiyada.
- **Twitter:** Nagala soco @PPSConnect.
- **Feesbuug:** Nagala soqo [www.facebook.com/pps.homepage](http://www.facebook.com/pps.homepage)
- **Fariin dirid:** Isku diiwaan gelinta fariin dirista ee loogu talagalay Fariin Qaadaha Dugsiga adiga oo fariin ku diraya HAA una diraya 68453

## Macluumaadka Hawada xumaata

Badbaadadu waa muhiimada ugu weyn inta lagu jiro xaaladaha hawadu xumaato.

Goob kasta oo basku joogsado iyo wadada la marayo dib ayaa loo eegay si loo go'aamiyo haddii goobta la joogsado ee beddelka ah ee barafka loogu talagalay ama wadada barafka loogu talagalay loo baahan yahay. Xaaladaha qaarkood wadooyinka caadiga ah dib ayaa looga noqdaa ama wakhtiyada qaarkood wax baa laga beddelaa oo waxa laga dhigaa maalmaha barafku da'ayo Fadlan hubi macluumaadkaaga la cusboonaysiiyay ee wadooyinka barafka loogu talagalay, iyo sidoo kale, wadooyinka caadiga ah iyo wakhtiyada: [www.pps.net/bus](http://www.pps.net/bus) ama <https://sites.google.com/pps.net/gt-bus-schedule/>.

## Waxyaabaha aad u baahan tahay in aad ogaato

- Ku dhawaaqidda wadooyinka barafka loogu talagalay waxaa laga yaabaa in ay weheliso 2 saacadood oo dib loo dhigo furitaanka, ama xiritaan wakhti hore la xirayo. Baska wuxuu raaci doonaa sida ku haboon waqtiyada dambe ee dugsiga la furayo iyo waqtiyada hore ee dugsiga laga baxayo;
- Marka ay dhacdo in ay PPS ku dhawaaqdo in 2 saacadood oo dib loo dhigay furitaanka maalin uu dugsigaaga jadwalka gashaday in ay noqoto maalin dib loo dhigayo furitaanka, dugsigaaga wuxuu bilaabmi doonaa 2 saacadood ka dib wakhtigaagii caadiga ah ee dawanka/jalasku dhici jiray – maaha 2 saacadood ka dib wakhtiga dib loo dhigay furitaanka;
- Ardayda waa in ay basaska ku sugaan masafo ammaan ah oo wadada ka shishaysa inta lagu jiro xaaladaha hawadu xumaato;

- Suurtagal maaha in ay jiraan wakhtiyo sax ah oo meesha la joogsanayo inta lagu jiro maalmaha barafku da'ayo iyadoo ay ugu wacan tahay dib u dhaca aan la saadaalin karin ee isku socodka gaadiidka, ardaydu waa in ay waqti hore joogaan meelaha la joogsado ee barafka loogu talagalay
- Ardaydu waa in ay si diiran u labistaan isla markaana u diyaar garoobaan wakhtiyo dheeraad ah oo dibada la joogayo maalmahani;
- Waalidiinta ayaa mas'uul ka ah ammaanka ardayda joogta goobaha basku joogsado, waana in ay carruurtooda u tilmaamaan socodka badbaadada leh iyo nidaamyada sugitaanka la xiriira;
- Basaska waxaa ku rakiban raadiyaha la iskala hadlo waxayna sidoo kale ku qalabaysan yihiin taayirada cimilooyinka kala duwan oo dhan loogu talagalay iyo silsilado;
- Isticmaal meel-qabsiga marka aad soo fuulasyid ama aad ka dagaysid baska si aadna u simbiririxoon.
- Ha ku istaagin hana ku cayaarin barafka tuuran Goobta joogsiga baska. Ha ku tuurin barafka gaariga ama dadka.
- Marna ha isku dayin inaad soo qaadato alaab kaaga dhacday aagga ama hoosta baska. Taa badalkeed, mar waliba ogaysii dhacdadaa oo kale darawalka baska.
- Marna ha ka daba ordin baska ama ha daba qabsan.

## Iskuulada loo qoondeeyay Wadada barafka loogu talagalay

Haddii aad maqashid ogeysiis ah in PPS ay bilaabayso wadooyinka barafka loogu talagalay, isticmaal jadwalka soo socda si aad u go'aamiso haddii jidkaaga caadiga ahi uu leeyahay waddo kale oo baraf loogu talagalay iyo joogsiyada baska ee la xiriira. Jadwalka hoose waxaa abaabulay **Dugsiga iyo Lambarada Waddada Joogtadaha**.

Haddii **aaan** arkin dugsigaaga oo meesha ku qoran ama **Lambarka Wadada Joogtada ah**, macnaheedu waa in baskaagu mari doono jadwalka iyo goobaha basku joogsado ee caadiga ah.

Haddii magaca iskuulkaaga hoostiisa aad ku aragto Lambarka Wadada Joogtada ah markaa waad leedahay wadada iyo joogsiga barafka loogu talagalay.

Booqo [www.pps.net/bus](http://www.pps.net/bus) ama <https://sites.google.com/pps.net/gt-bus-schedule/> si aad u aragto sharaxaadda Wadooyinka Barafka loogu talagalay.

Haddii aad leedahay goobta la joogsado oo barafka loogu talagalay, fadlan wakhtiyada la joogsanayo wadadaada barafka loogu talagalay ka hubi website-ka PPS: [www.pps.net/bus](http://www.pps.net/bus). Wadooyinka barafka loogu talagalay waxaa laga yaabaa in goobaha joogsiga iyo wakhtiga loogu talagalay ee kala duwan ay lahaadaan saa dhammaan adeegga goobaha joojisyada ee xilliga hawada xumaato lama samayn karo.